SOMALI

# KU OGOW XUQUUQDAADA

## KADIB MARKII DIIDMO LAGU SIIYO

LEGAL CENTRE LESVOS

**Xaashidan waxaa ku xusan xuquuqdaada, hadii aad heshid go'aan diidmo ah marka aad tahay qof maganagaliyo doon ah sida ku xusan habraaca xuduudada jazeerada levos ee gariiga.**

**Waxa uu ku saleesanyahay sharciga gariiga waxayna ku beegan tahay taariikhda July 2021**

**Xogtaan waxay wajahaysaa is badalo. Waana la badali karaa mustaqblka. Waxan kuu soo jeedineenaa inaad la taashatid qareen ruqsadeesan ama hay.ad ku siiso latalin sharci oo bilaash ah oo ku saabsan xaalad kasta kiiskaada**

- Haddii aad hesho go'aan diidmo (rejact) codsigaaga magangalyo, waxaad ka doodi kartaa ama racfaan ka qaadan kartaa go'aanka diidmada ah, si aad u codsato in kiiskaaga dib loo eego.

- Si aad taas u samayso, wadooyinkan kala duwan ayaa kuu diyaar ah, taasoo ku xidhan hadba heerka nidaamka magangalyada aad mareyso.

- Wakhtiyada kama dambaysta ah ee sidaas lagu samaynayo badanaa waxaa lagu qoraa Ingiriis dhamaadka go'aankaaga.

# HADII AY KU SOO DHACDO DIIDMO JAWAABTII 1.AAD AH

## (interview koobaad kadib)

- Waxaad haysataa 10 maalmood oo aad kaga doodid go'aankan laga bilaabo marka aad hesho, adiga oo dalbanaya "rafcaan"
- Si taas u sameeso, waa in aad saxiixdo dukumeentiga uu bixiyay xafiiska magangalyada oo sharxaya inaad rabto inaad racfaan qaadatid
- Waxaad xaq u leedahay in aad hesho qareen dawladeed oo bilaash ah kuugu matalo racfaankan. Markaad saxiixdo dukumeentiga si aad rafcaan ugu qaadato go'aankaaga, codso inaad hesho qareen .

- Racfaankaaga waxaa eegi doona mid ka mid ah Guddiyada Maamulka Racfaanka ee Athens.
- Taariikhda maxkamada la geyn doono racfaankaga waa lagula wadaagi doonaa waxaana lagu qori doonaa warqadda aad saxiixday si aad racfaan uga qaadato.
- Guddiga Racfaanka ayaa dib u eegi doona kiiskaaga kaliya iyadoo lagu saleynayo dukumeentiyada qoran ee lagu xareeyay kiiskaaga. Inta badan kiisaska, ma jiri doono dhageysi afka ah oo racfaankaaga ah, laakiin marar dhif ah, Guddiga Racfaanka ayaa laga yaabaa inay codsadaan inaad joogtid inta lagu jiro baaritaanka rafcaanka si aad u u marto wareysi afka ah. Haddi ay dhacdo taas , fadlan ha lumin fursadan oo la tasho qareen si uu ku raaco haddii ay suurtogal tahay.

- **Haddii qareen dawladeed bilaash ah laguu xilsaaray**:
  - Weydii faahfaahin asaga ku saabsab iyo meel aad kala soo xariirto asaga/iyada.
  - Isku day inaad ballan la yeelato qareenka dawladda, si aad u sharaxdo kiiskaaga, u bixiso xog kasta oo dheeraad ah ama cusub iyo dukumeenti taageeraya dacwadaada magangalyo dlbashada ah, sharax wax kasta oo khaldamay intii lagu jiray waraysiga magangalyada oo u gudbii wixii caddayn ah ee loo baahan yahay.
  - Qareenka dowlada ayaa diyaarin doona. warqad qoraal ah oo lagula saxaayo khalad kasta oo si sharci ah u taageeraya racfaankaaga. Isaga/iyadu waxay soo gudbin doonaan qoraalka ka hor taariikhda rafcaankaaga la qaadayo.

- **Haddii qareen dawladeed xor ah aan laguu magacaabin**, isku day inaad talo sharci ka raadsato NGO ku siinaya taageero sharci oo bilaash ah iyo qareen Giriiga u dhashay

# HADII AY LAGU SIIYO DIIDMO 2.AAD

(ay soo saareyn gudiga racfaanka)

Waxaad kaga doodi kartaa go'aanka darajada labaad  laba siyaabood oo kale ah:

**Tan 1.aad waxaa furan kartaa dacwad maxkamada ah**

- Codsiga burinta waa in lagu xareeyaa Maxkamada Maamulka Giriiga 30 maalmood gudahooda laga bilaabo ogeysiinta go'aanka diidmada ah. Fadlan ogow in qof kastaa aanu samayn karin rafcaan noocan oo kale ah: waa qaali

- (Waxaad u badan tahay inaad adigu daboosho khidmadaha sharciga iyo maxkamadda) rafcaankuna wuxuu leeyahay shuruudo adag: waa inay jireen khaladaad habraac ama sharci ah oo ku saabsan maaraynta kiiskaaga.

- Waxaad had iyo jeer u baahan doontaa qareen Giriig ah inuu ku matalo nidaamkan.

**Tan 2.aad : waa in aad isa soo cusbooneysidaa.. Feel cusub furataa**

Waxaad u baahan tahay inaad keento caddaymo cusub oo la taaban karo oo taageeraya kiiskaaga. **Waxayna noqon kartaa**

- ❖ Caddeyn aadan soo gudbin inta lagu guda jiro wareysiga koowaad, sida dukumeenti caafimaad cusub, caddayn cusub ama macluumaad cusub oo adiga, qoyskaaga ama dalkaaga asalka, iwm.
- ❖ Caddayntan cusub waa inay noqotaa mid la taaban karo oo macnaheedu yahay muhiim in lagu taageero sheegashadaada magangalyo doonka ah waxaa laga yaabaa in la beddelo natiijada kiiskaaga.
- ❖ Waa muhiim inaad sidoo kale sharaxdo sababta aadan ula wadaagin caddayntan cusub ka hor (inta lagu jiray waraysigaaga koowaad iyo tii racfaanka

- ❖ Xafiiska Magangalyo doonka Giriiga ayaa marka hore eegi doona in codsigaaga danbe uu yahay mid la aqbali karo iyo in kale, taas macnaheedu waxa weeye inaad awooday inaad soo bandhigtay cadaymo cusub oo ku filan dib u qiimaynta kiiskaaga.

  - ➢ Hadii codsigaga danbe la arko mid la aqbali karo, waxa aad heli doontaa waraysi cusub oo lagu qiimaynayo codsigaga iyo caddaymaha la gudbiyay.

  - ➢ Haddii Adeegga Magangalyada Giriiggu u arko in dalabkaagu aanu ahayn mid la aqbali karo, ama uu diido codsigaga dambe waxaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aankan (tan, eeg xagga sare "**Haddii aad hesho diidmo tusaale koowaad ah**).

**WhatsApp:** +30 694 961 8883
**Landline:** +30 225 1040 665
**Iimaylka:** info@legalcentrelesvos.org
**Facebook:** www.facebook.com/LesvosLegal
**Cinwaanka xafiiska:** Sapfous 2, Mytilene 81100
**Saacadaha shaqada :** Isniinta ilaa Jimcaha - 10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo